



# **Qorshaha Furitaanka Iskuulada ee Xilliga Dayrta 2020: Faahfaahinta iyo Fursadaha Fikradaha Lagu Biirinayo Degdeg Baan Idiinla Wadaagi Doonaa**

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxa aan soo gaadhay maalintii ugu dambaysay sanad-dugsiyeedka taasi oo ah taariikh aan hore u soo marin Dugsiyada Dadweynaha Portland. Xanuunka caabuqa ee COVID-19 wuxuu culeys galiyey qof kasta oo ka mid ah bulshadeena, iyada oo aan run ahaantii rajeyneyno in aan idin siinay addeegyadii aan diirada ku saarayney ee hawgalintii baahiyaha assaasiga ahaa, iyada oo aan isla habeen u guurnay in ardaydeenu waxbarashadoodii ku qaataan guryaha iyo waliba iyada oo aan ognahay in aan wax badan ka barano. Waxaad ku mahadsan tihiin samirkiina, sida aan u fahamteen iyo dabacsanaantiina idinka iyo ardaydiinuba aad na tusteen saddexdii bilood ee u dambeeyey

Shaqaalaha degmadu waxa ay ka shaqeynayaan iyaga oo qorsheynayey ilaa bishii Maarso sidii sanad-dugsiyeedka 2020-21 loo furi lahaa xilliga dayrta. Waxaan tixgalinay qorshayaal dhowr ah oo faahfaahsan kuwaasi oo suurtagal sidii loo furi lahaa, lana eegay dhibaatooyinka ka iman karan taasi oo xaaladu ay si dhakhso ah isku bedeli karto inta lagu jiro xilliga xaggaaga. Iminka waxa aynu sugi tallooyinka todobaadkan ka imanaya Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Marka aynu helno tallooyinkaasi, waxa aan si degdeg ah isku waafajin doonaa tilmaamaha ODE iyo qorshayaasheena iyo kartideena. Waxaan rajeyneynaa todobaadka soo socda in aan bilaabi doono in aan si toosa ula soo xiriirno ardayda, macallimiinta iyo qoysaska sidii aan u weydiin lahayn wixii tallo ah ee iyaguna ku biirinayaan, waxa ay doorbidayaan iyo heerka ay ku niyadsan yihiin dhowrka xaaladood ee la xiriira.

Fadlan waxaad nagala socotaa dhinaca emailka todobaadka soo socda, iyada oo aragtidiina sida aad wax u aragtaan ay aad muhiim ugu tahay kartidayada aan ku dhammeystirayno qorshayaashayada xilliga dayrta. Haatana, waxaan idiin rajeyneynaa caafimaad iyo nabadgalyo aad ku bilowdaan fasaxa xaggaaga.